NEBRASKA
Good Life. Great Mission.

Adeegyada Loo Heli Karo ee Kurayda iyo Dhalinyarada Waaweyn ee Indho La' ah ama Aragtida Dhibaato ka Haysata

Wax badan oo isbeddel ah ayaa kugu soo wajahan kolka aad ka gudbeyso adeegyada dugsiga una gudbeyso adeegyada dadka waaweyn. Hagahaan ayaa kaa caawin doona cida ay tahay inaad la xariirto iyo waxa aad rajayni doonto.

Dulmarka guud iyo Xogta Xiriirka ee Hay'adaha

Macallimiinta dugsiga sare, hay'adda NCBVI ee taageerta dadka indhoolayaasha ah iyo kuwa aragga daciifka ah, iyo DHHS–DDD waxay si wadajir ah kuu taageeraan si aad shaqo u hesho, u noqoto mid madax-bannaan, iyo bulshadaada ugu adeegato. Haddii waalidkaa ogolaansho bixiyo, dugsigaagu wuxuu ku casuumi karaa NCBVI iyo DDD kulamadaada si ay kaaga caawiyaan horumarinta qorshahaaga u-gudbidda.

Markaad tahay arday jiro 14 jir ilaa 21 jir, waa inaad isticmaali kartaa adeeg kheyraadka dugsigaaga iyo NCBVI. Kolka aad dugsiga dhameyso, NCBVI ayaa sii wadi doonta inay kula shaqeyso.

Marka aad u qalanto adeegyada kharash- ka dhaafida, DDD waxay ku siin doontaa maalgelin ku saleysan baahiyahaaga. Adeegyada kharash ka dhaafida ee shaqada iyo hawlaha kale ee maalintii ayaa la heli karaa marka aad gaarto 21 sano jir, kadib marka sannadka dugsiyeedku dhammaado.

Hagahaani wuxuu kuu sharaxayaa adeegyada aad ka helaysid dugsigaaga. Kadibna waxuu isa soo bardhigayaa adeegyada laga heli karo NCBVI iyo DDD.

Dugsga

Waxaad xaq u leedahay adeegyo waxbarasho oo gaar ah iyo maamuus marba hadaad tahay curyaan oo aad u baahantahay waxbarasho gaar ah. Tani waxaa la heli karaa ilaa aad ka qalin jabineyso, ama ilaa aad ka gaareyso dhamaadka sanad dugsiyeedkaaga goorta aad gaarto 21 sano jir.

Guddiga Nebraska ee Indhoolayaasha iyo Arag-daciifka - NCBVI (Tababarka Shaqada)

NCBVI waxay caawisaa dadka indhoolayaasha ah iyo kuwa araggoodu daciifka yahay, xitaa haddii ay leeyihiin naafonimooyin kale oo dheeraad ah, si ay ugu diyaar garoobaan shaqo, u helaan shaqo, oo ay u sii hayaan shaqadaas iyada oo la siinayo tababar iyo fursado shaqo. NCBVI waxay sidoo kale gacan ka geysataa caawinta shirkadaha iyo goobaha shaqo si ay u qortaan, u tababaraan, u sii joogteeyaan shaqaale leh dhibaato aragga ah. Ardayda 14 ilaa 21 jir, NCBVI waxay bixisaa adeegyo kahor shaqo si ay ugu diyaargaroobaan shaqo mustaqbalka. Adeegyadani waxay ka mid yihiin barashada shaqooyinka kala duwan, waayo-aragnimo shaqo oo toos ah, sahminta fursadaha waxbarasho kadib dugsiga sare, tababar ah sida shaqo loogu diyaargaroobo, iyo barasho ah sida aad naftaada ugu doodi karto.

NCBVI

Guddiga Nebraska ee Indhoolayaasha iyo Arag-daciifka
4600 Valley Rd. Ste. 100; Lincoln, NE 68510
402-471-2891 (taleefan lambarka)
402-471-3009 (fakis ahaan)
ncbvi.autho@nebraska.gov

DHHS – Waaxda Naafonimada Horumarineed (DDD)

DHHS – Waaxda Naafonimada Horumarineed (DDD) waxay maalgelisaa oo kormeerta adeegyada Medicaid ee lagu bixiyo heerka guri iyo heerka bulsho (HCBS), kuwaas oo ah adeegyo kharash laga dhaafay. Kuwaani ayaa la heli karaa marka aad buuxiso shuruudaha u-qalmitaanka iyo heerka daryeelka. Ujeeddadu waa in lagu caawiyo si aad u noolaato adigoo madax-bannaan oo bulshadaada qayb uga noqda. Marka aad noqoto 21 sano jir, shaqo helistu waxay noqotaa mid si gaar ah loo sii xoogeeyo.

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (DHHS), qaybteeda Naafonimada Horumarineed
301 Centennial Mall South; P.O. Sanduuqa 98947; Lincoln, NE 68509-8947 (877) 667-6266 (telefoon)
(402) 471-8792 (fakis ahaan)
dhhs.dddCommunityBasedServices@nebraska.gov

Miyaan u baahanahay mas'uul?

Dugsiga: Waalidkaaga ama qofka sharci ahaan masuulka kaa ah waa inuu kaa caawiyo sameynta qorshahaaga waxbarasho (IEP) ilaa aad noqoto 21 sano jir, inkastoo aad 19 sano jirtay oo (loo arko qof qaangaar ah).

NCBVI	DDD
Haddii aad ka yar tahay 19 sano, waalid ama ilaaliye sharci ah waa inuu saxiixo Foomkaaga Ogolaanshaha iyo Sii-deynta Adeegyada Kahor U-gudbidda Shaqo iyo foomamka NCBVI-VR haddii ay khuseeyaan.	Uma baahnid mas'uul sharci ah si aad u hesho adeegyo.

Waxaad tixgelin kartaa taageero aan aad u xaddidnayn, sida go'aan-qaadasho la taageeray (supported decision making) ama wakiil awood leh (POA) oo ku saabsan go'aannada caafimaad ama dhaqaale.

Haddii adiga ama waalidkaa ay qabaan su'aalo ku saabsan taageerada go'aan qaadashada, wakiil sharci (POA), ama qof mas'uul sharci ahaan laguu sameeyo, hay'adaha hoos ku qoran ayaa idin caawin kara:

- Arc of Nebraska 402-475-4407
- Disability Rights of Nebraska 800-422-6691
- League of Human Dignity 402-441-7871
- Office of Public Guardian 402-471-2862
- PTI (Parent Training & Instruction) 800-284-8520

Waa maxay adeegyada aan heli karo?

Dugsi: Adeegyadaada waxbarashada gaarka ah, hawlaha, iyo dejinnada waxaa lagu saleeyaa yoolalkaaga sannadlaha ah iyo yoolalkaaga kadib dugsiga sare. Tani waxa ay ka mid tahay halka aad rabto inaad ka shaqeyso, waxa aad u baahan tahay inaad barato, iyo halka aad rabto inaad ku noolaato. Marka aad dugsiga joogto, adeegyada waxaa ka mid noqon kara barid gaar ah, daaweynta, qalab iyo tignoolajiyo kaa caawiya, taageerooyin fudud, qorshe u-gudbid, fursado aad shaqo ku barato, iyo tababar ku saabsan xirfadaha nolosha madaxa-bannaan. Haddii danahaaga ama xirfadahaagu is beddelaan, yoolalkaaga iyo adeegyada laguu qorsheeyayna way is beddeli karaan.

NCBVI	DDD
Adeegyada Pre-ETS waxaa loo heli karaa ardayda qaba naafo aragga ah ee da'doodu u dhaxayso 14 ilaa 21 sano.	Adeegyada waxaa lagu saleeyaa baahiyahaaga la aqoonsaday iyo qorshahaaga qoraalka ah. Adeegyada kharash-ka-dhaafidda waxaa bixiya Medicaid, sidaas darteed si aad adeegyada u hesho waa inaad haysataa Medicaid.
Adeegyada Kahor U Gudbidda Shaqo waxaa ka mid ah: • Sahminta shaqooyinka • Tababarka diyaarinta goobta shaqada • Waxbarashada ku saleysan shaqada • Sahminta Waxbarashada Dugsiga Sare kadib • Casharro ku saabsan naf u doodista • NCBVI ayaa waxay ka soo qayb gali kartaa kulumadaada IEP	Marka la go'aamiyo in aad u qalanto: • Waxaad helaysaa Isu-duwaha Adeegga (SC) si uu kuugu fududeeyo inaad hesho adeegyada • Adeegyada guryaha waxaa laguugu siin karaa gurigaaga si ay kaaga caawiyaan xirfadaha nolol maalmeedka, isla markaana ay kaaga taageeraan inaad bulshadaada gasho. • Adeegyada kale ee lagu kafaali-qaadi karo baahiyahaaga waxaa ka mid noqon kara nasashada, Tiknoolojiyadda Gargaarka, iyo wax-ka-beddelka guriga iyo gaadiidka. Isu-duwahaaga Adeegga (SC) ayaa kaa caawin doona inaad aqoonsato oo aad hesho adeegyada aad u baahan tahay.
Haddii adeegyo dheeraad ah oo gaar ah iyo tababbarka xirfadaha loo baahdo, adeegyada VR ayaa loo heli karaa dadka u qalma ee da'doodu ka weyn tahay 21 sano.	Marka aad gaarto 21 sano oo aad dhamaysato dugsiga sare, adeegyada maalinta ayaa kuu diyaar noqonaya si ay kaaga caawiyaan inaad shaqada sii haysato, tabaruce noqoto, ama aad kordhiso xirfadaha loo baahan yahay si aad shaqo u hesho.

Sidee ayaan u codsadaa?

Dugsi: U-qalmitaanka Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ma dammaanad qaadayso inaad sidoo kale u-qalmi doonto adeegyada NCBVI ama DDD.

NCBVI	DDD
Waxaad ka soo codsan kartaa adoo soo isticmaalaya: • Wacaya (402) 471-2891 • In laguu gudbiyo qof kasta oo kale	Waxaad codsan kartaa onleen adigoo booqanaya: https://iserve.nebraska.gov/ ama waxaad codsan kartaa foom codsi warqad ah: • Xafiis kasta oo DHHS ah oo ku yaalla Nebraska • Adigoo wacaya taleefan bilaash ah (877) 667-6266
Marka lagu gudbiyo, lataliyaha VR ayaa kuu qaban doona kulan si uu kula hadlo adiga iyo waalidkaa ama mas'uulkaaga sharci ee ku ilaalinaya, isaga oo kaala hadlaya adeegyada diyaar u ah ama tallaabooyinka xiga.	Haddii aad u baahan tahay gargaar si aad u buuxiso codsi, waxaad booqan kartaa xafiiska DHHS ee deegaankaga.

Barashada Eraybixinta

Waxaa jira erayo kala duwan oo loo adeegsado qorshahaaga qoran iyadoo ku xiran cidda bixisa adeegyadaada. Kooxo dadka ku taageera oo ku adeega ayaa qorshe kasta kula sameeya adiga. Qorshayaasha waxaa lagu qoraa inta lagu jiro kulamada.

- **Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiga ah (IEP):** Qorshaha dugsiga ee yoolalka waxbarasho iyo adeegyada gaarka ah. Waxaa ka mid ah yoolalka waxbarasho ee sanadlaha ah iyo yoolalka kadib marka aad qalinjabiso. Hadafyadu waxay ka mid noqon karaan meesha aad rabto inaad ka shaqayso, waxa aad u baahan doonto inaad barato, iyo halka aad rabto inaad ku noolaato. IEP-gaagu waxaa ka mid ah waxbarasho gaar ah, dejinno, iyo hawlo kaa caawinaya inaad gaarto yoolalkaaga.
- **Qorshaha Shaqo ee Gaar ahaaneed (IPE):** waa qorshaha shaqo ee NCBVI. Waxaa ku jira adeegyo kaa caawinaya inaad gaarto yoolalkaaga.
- **Qorshaha Shaqsiga-ku-salaysan (PCP):** Qorshaha DDD ee yoolalka shaqsiga ah. Waxaa ka mid noqon kara ka qaybgalka bulshada, xirfadaha nolol maalmeedka, kuwo shaqeed, iyo hawlaha firaaqada.

Halkee ayaan la heli karaa adeegyada?

Dugsiga: Waxaad heli doontaa IEP iyo adeegyo waxbarasho oo gaar ah haddii naafonimadaadu si weyn u saamayso barashadaada dugsiga. Marka aad qalin-jabisid ama aad gaartid 21 sano ka hor sannad-dugsiyeedka xiga, ma sii heli doontid adeegyada waxbarashada gaarka ah.

NCBVI	DDD
Adeegyada waxaa loo heli karaa ardayda qaba naafonimada aragga ee da'doodu u dhaxayso 14 ilaa 21 sano.	U qalmitaanka adeega ayaa lagu go'aamin karaa da'aad kasta.
Adeegyada Kahor U Gudbidda Shaqo waxaa ka mid ah: • Sahminta shaqooyinka • Tababarka diyaarinta goobta shaqada • Waxbarashada Dugsiga Sare ka dib • Waxbarashada ku saleysan shaqada • Casharro ku saabsan naf u doodista	Waa inaad codsataa adeegyada kharash ka-dhaafitaanka marka aad u baahan tahay Qiimayn ayaa lagu go'aamin doonaa sida adeegyadaas ay uga dabooli karaan baahiyahaaga iyagoo ku caawinaya gurigaaga iyo bulshadaada dhexdeeda.
NCBVI waxay ka qayb geli kartaa shirarkaaga IEP.	Marka aad gaarto 21 sano oo aad ka qalin-jabisid dugsiga sare adeegyada maalinta ayaa la heli karaa si ay kaaga caawiyaan inaad shaqada sii haysato, tabarucdo ama aad kordhiso xirfadaha lagama maarmaanka u ah inaad ku biirto shaqo-abuurka.
Haddii adeegyo dheeraad ah oo gaar ah iyo tababbarka xirfadaha loo baahdo, adeegyada VR ayaa loo heli karaa dadka u qalma ee da'doodu ka weyn tahay 21 sano.	

Waa maxay shuruudaha u qalmitaanka adeega?

Dugsi: Si aad u hesho waxbarasho gaar ah waa inaad leedahay naafo si weyn u saameysa barashadaada, xirfadahaaga, iyo awoodahaaga. Kooxdaada IEP (macallimiinta waalidiinta iyo dadka kale ee kula shaqeeya) ayaa dib u eegaya hadafyadaada iyo horumarka aad samaynayso oo waxayna go'aaminayaan haddii aad weli u baahan tahay waxbarashada gaarka ah.

NCBVI	DDD
Waa inaad qabtaa naafonimada aragga si aad u hesho Adeegyada U gudbida Shaqo ee Hore.	Waa inaad buuxisaa qeexidda naafonimada horumarineed ee ku cad sharciyada Nebraska (Neb.). Rev. Stat. 83-1205. Naafonimada laguma tixgelin karo haddii kaliya ay sabab u tahay xanuunka dhimirka.
Haddii adeegyo gaar ah iyo tababbarka xirfadaha dheeraad ah loo baahdo waxaad codsan kartaa adeegyada VR ee NCBVI.	Naafonimada waa inay kugu bilaabantaa ka hor 22 sano jir, waana in ay noqotaa mid cimrigaaga oo dhan sii socon doonta.
Si aad u hesho Adeegyada NCBVI-VR waa inaad: • Si aad u hesho Adeegyada NCBVI-VR waa inaad qabtaa naafonimada aragga oo ah Aragga oo aad u hooseeya oo sharci ahaan loogu tixgeliyo indho la'aanta, indho la'aanta daciifka ah, ama cudur isha ku dhaca oo sii xumaanaya oo ugu dambayn sababi doona indho la'aan sharci ah; • Qabtaa naafonimada aragga oo caqabad weyn ku ah shaqo helidda; • Awood u leedahay inaad ka faa'iidaysato marka laga hadlayo natiijo shaqo; iyo • U baahato adeegyada soo-celinta shaqada si aad isu diyaariso, u hesho, u sii haysato, ama dib u hesho shaqo.	Naafonimadaadu waa inay keentaa xaddidaad weyn oo ku saabsan meelahan soo socda: • Xirfadaha fikradaha: luqadda, akhris-qorista, lacagta, waqtiga, tirooyinka, iyo is-hagidda shaqsiyeed. • Xirfadaha bulsho: sida aad dadka ula dhaqanto, masuuliyaddaada bulshada, inaad isku qaddariso, in aan si fudud lagu sirin, inaad ahaato feejigan, inaad xaliso dhibaatooyinka bulshada, inaad raacdo xeerarka, iyo inaad ka fogaato in lagaa faa'iideysto. • Xirfadaha wax ku oolka ah: hawlaha nolol maalmeedka, is-daryeelka, xirfadaha shaqo, daryeelka caafimaadka, dhaqaaqa, iyo awoodda nolol madaxbannaan.
NCBVI waxay la shaqaysaa dugsigaaga iyo waalidiintaada si ay u ururiyaan macluumaadka lagama maarmaanka ah ee lagu go'aaminayo u-qalmitaankaaga adeegyada. Tani waxaa ka mid noqon karaan xogta waxbarashada gaarka ah ama diiwanada caafimaadka.	DDD waxay la shaqeysaa adiga iyo waalidkaa si loo ururiyo macluumaad. • Kuwaani waxaa ka mid ah diiwaanada waxbarasho iyo mida caafimaadba. • Waa in ay jirtaa dukumeenti caddeynaya ogaanshaha cudurkaaga.
	Waa inaad buuxisaa shuruudaha Heerka Daryeelka ee xarunta daryeelka dhexdhexaadka ah ee loogu talagalay dadka qaba naafo maskaxeed (ICF-IID) ee horay u qabay iyo sanad walba.

Sidee ayaa loo go'aamiyaa shuruudaha u qalmitaanka?

Dugsi: Saddexdii sanoba mar, macallimiintaada iyo shaqaalaha kale ee dugsigu waxay ururiyaan macluumaad ku saabsan sida naafonimadaadu u saamaynayso waxbarashadaada. Kooxdaada IEP, oo aad adiga ka mid tahay, waalidiintaada, macallimiintaada, iyo khubarada kale ee kula shaqeeya, ayaa dib u eegaya macluumaadkan si ay u go'aamiyaan haddii aad weli buuxiso shuruudaha lagu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah.

NCBVI	DDD
Adeegyada Kala-guurka ee Shaqaalaysiinta Kahor, saxeexa waalidka ama masuulka ee xaqiijinaya naafada aragga ayaa ku filan.	DDD waxay heshaa codsigaaga waxayna dib u eegtaa dhammaan diiwaannada la soo gudbiyay.
Adeegyada NCBVI-VR, codsi la saxiixay iyo dukumeenti caddeynaya u-qalmitaanka ayaa loo baahan yahay.	DDD waxay qofka u qalma siin doontaa adeegyada maalinta markuu 21 jir yahay iyo kan ka qalin jabiyay dugsiga sare.
NCBVI waxay leedahay 60 maalmood si ay u go'aamiso u-qalmitaanka adeegyada VR	DDD waxay haysataa 90 maalmood si ay u ururiso diiwaannada isla markaana go'aan uga gaarto.
NCBVI ayaa kuu sheegi doontaa go'aanka.	DDD waxay kugu ogeysiin doontaa go'aanka qoraal ahaan.

Khayraadka ka imanaya DDD

Qof kasta ayaa codsan kara foomka lagu go'aaminayo u-qalmitaanka adeegyada DDD.

Bogga U-qalmitaanka DDD wuxuu leeyahay macluumaad ku saabsan habka ugu faa'iidada badan ee lagu diiwaangeliyo natiijooyinka qiimaynta ee MDT. Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad dugsigaaga u gudbiso macluumaadka loogu talagalay cilmi-nafsiga dugsiga.

"**Buug-yaraha "Ready, Set, Go!"** " wuxuu sharxayaa adeegyada laga heli karo DDD.

"**Buug-yaraha "Transitioning from Educational to Adult Services**" wuxuu ka kooban yahay jaantusyo hab-raac ah oo sharxaya u-gudbidda adeegyada kharash-ka-dhaafidda dadka waaweyn.

"**Qodobada Talooyinka Macallimiinta**" waxay leeyihiin macluumaad ka caawinaya macallinkaaga inuu fahmo adeegyada ka-dhaafitaanka kharashka, oo ay ku jiraan liis qiimayno ah oo dugsigu qaban karo si loo taageero u-qalmitaanka ka-dhaafitaanka, iyo talo ku saabsan in lagu casuumo Isu-duwahaaga Adeegga (SC) shirarkaaga IEP.

Ma waxay tahay inaan sugo adeeguada?

Dugsiga: Haddii aad naafo tahay oo aad u baahan tahay waxbarasho gaar ah, waxaad heli doontaa waxbarasho gaar ah, adeegyo iyo taageerooyin, iyadoo lagu saleynayo IEP-gaaga.

NCBVI	DDD
Adeegyada U Gudbida Shaqo ee Hore ayaa isla markiiba loo heli karaa ardayda qaba naafonimada aragga, iyadoo la haysto oggolaansho iyo fasax la saxiixay.	Goorta aad u qalanto, adeega Iskuduwida ayaa ah midka markaa la helaayo.
Ma jiro liis sugitaan oo loogu talagalay adeegyada VR ee gaar ahaaneed, waana mid aad isla markiiba aad codsan karto.	Qofka u qalma waxaa loo sameyn doonaa qiimayn si loo ogaado adeegga kharash ka dhaafida ee ugu habboon baahiyihiisa. • Dadka badankooda ee da'doodu tahay 21 ama ka yar waxaa la siinayaa adeegga loo yaqaan Adeegga taageerada qoyska. • Dadka intooda badan ee 21 sano jiro iyo waxa ka weyn, kuwaas oo dhammeystay sannadka dugsiyeedka, waxay heli doonaan kharash ka dhaafida Maalmeedka Dadka Waaweyn ee Naafonimada Horumarineed. • Adeegga "Comprehensive DD Waiver" (kharash ka dhaafida dhameystiran ee dadka naafada ah) ayaa la heli karaa haddii qiimaynta lagu ogaado in loo baahan yahay.

Maxaa dhici karaa hadii aanan u qalmin adeegyada?

Dugsiga: Haddii aad qabto naafo oo aadan mar dambe u qalmin waxbarashada gaarka ah, waxaad codsan kartaa in lagu tixgeliyo Qorshaha 504. Qorshaha 504 wuxuu loogu talagalay ardayda naafo ah oo laga yaabo inay u baahan yihiin taageerooyin yar oo fudud. Maamuusyadaan waxay noqon karaan kuwo la mid ah kuwii aad ku heli jirtay IEP-gaaga.

NCBVI	DDD
Adeegyada U Gudbida Shaqo ee Hore waxaa loo heli karaa ardayda qaba naafonimada aragga ee da'doodu u dhaxayso 14 ilaa 21 sano.	Haddii lagu go'aamiyo inaadan u qalmin adeegyada, waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aankaas.
Haddii aad u baahan tahay adeegyo VR oo gaar ahaaneed, balse lagu sheego inaadan u qalmin ama aad mar dambe u qalmin, waxaad codsan kartaa in go'aanka dib loo eego.	Haddii aad haysato macluumaad cusub oo taageeraya ogaanshahaaga ama xaddidaadahaaga, waad codsan kartaa mar kale.
NCBVI waa inay soo bandhigaan caddeyn cad oo qancinaysa go'aankooda. Caddeynta waxaa ka mid ah diiwaannada aragga, waayo-aragnimada shaqo tijaabo ah, iyo kuwo kale oo la mid ah.	Qof kasta oo u qalma IEP ma noqon doono mid u qalma adeegyada DD.
U-qalmitaanka adeegyada kama dhigna in dhaqaale la heli karo.	

Tusaale

Waxaa la filayaa in qof kasta oo da'diisu u dhaxayso 18 ilaa 64 sano ugu yaraan uu sahmiyo adeegyada VR.

Maxaa dhacaya haddii aan go’aansado inaan ka qayb qaadan?

Dugsiga: Haddii aad dugsiga ka baxdo, go’aansato inaad qaadato GED, ama waalidkaagu diido waxbarashada gaarka ah, weli waad beddeli kartaa go’aankaas. Waalidkaaga wuxuu la xiriiri karaa dugsigaaga si uu u codsado waxbarasho gaar ah.

NCBVI	DDD
Adeegyada ayaa ah mid ikhtiyaari, waxaadna ka bixi kartaa adeegyada wakhti kasta. Waxaa lagu talinayaa in ardayda iyo qoysaskoodu ka wada hadlaan go’aankan lataliyaha VR.	Waxaad mar kale codsan kartaa mustaqbalka.
Haddii ardaygu qorsheynayo inuu galo adeegyada maalmeedka ee ku lug leh shaqo mushahar ka hooseeya heerka ugu yar, waxaa looga baahan yahay ardayga inuu codsado oo isku dayo adeegyada kala-guurka ee NCBVI Haddii kale, ardaygu uma qalmi doono shaqo mushahar ka hooseeya heerka ugu yar ilaa uu ka gaaro da’da 25.	Markaad dib u codsato, DDD waxay eegi doontaa u-qalmitaanka. Laguuma dammaanad qaadayo maalgelinta la heli karo.
Waxaad mar kale codsan kartaa mustaqbalka.	

Tusaale

Adeegyada NCBVI waxay kaa caawin karaan inaad sida ugu wanaagsan uga faa'idaysato dhammaan xirfadahaaga. Kuwaani waa waajibaadka shaqsiyaadka oo idil, oo ay ka mid yihiin kuwa leh curyaanimada la taaban karo. NCBVI waxay kaa caawin kartaa inaad hesho shaqo aad ku qabato iyadoo aad la shaqaynayso shaqaale kale oo aan lahayn naafonimo. NCBVI waxay kuu habayn kartaa fursado shaqo, kugu taageeri kartaa shaqadaada, ama ku siin kartaa adeegyo kale oo daboolaya baahiyahaaga, iyadoo ku xiran helitaanka dhaqaalaha.

Sharciga Hal-abuurka iyo Fursadaha Shaqaalaha (WIOA), Qaybta 511, wuxuu mamnuucayaa mushaharka ka yar kan ugu yar ee dadka da’doodu tahay 24 iyo ka yar. Ka-reebis ayaa jirta haddii la muujiyo caddayn badan oo waqti ku filan ah in yoolka shaqo tartan iyo isdhexgal ah aan suuragal noqon.

Maxaa dhacaaya inta lagu jiro sanad dugsiyeedka sare?

Dugsi: Marka aad gaarto 14 sano, macallimiintaadu waxay kaa caawinayaan inaad barato xirfadahaaga, awoodahaaga, iyo danahaaga, oo ay ku jiraan halka aad rabto inaad ka shaqeyso (shaqo), waxa aad u baahan tahay inaad barato (tababar/kulliyad), iyo halka aad rabto inaad ku noolaato.

IEP-gaaga waxa kale oo ku jira yoolal loogu talagalay kadib marka aad dhamayso dugsiga sare. Si aad ugu diyaar garowdo yoolalkan, IEP-gaaga wuxuu ku qori doonaa fasallada aad ku baran doonto dugsiga sare. IEP-gaaga waxa kale oo ku jira hawlo kuu fududeynaya mustaqbalka shaqada, sida: la socodka qof shaqadiisa, waayo-aragnimo shaqo, booqashada goobaha shaqo, barashada fursadaha shaqo, carwooyin shaqo/xirfadeed, iyo tababar ku saabsan diyaarinta shaqada. Marka aad barato xirfadahaaga iyo waxa aad xiisaynayso, yoolalkaaga nolosha kadib dugsiga sare way is beddeli karaan.

Haddii waalidkaagu ogolaado, hay'ado kale oo kaa caawin doona marka aad dugsiga ka baxdo waa lagu casuumi karaa kulankaaga IEP si ay kuugu taageeraan qorshaha nolosha kadib dugsiga.

NCBVI	DDD
NCBVI waxay la shaqaysaa iskuulkaaga si ay kuu siiso Adeegyada U-gudbinta Shaqada Hore.	Inta aad dugsiga sare ku jirto, adeegyada kharash ka dhaafida ma beddeli karaan adeegyada laga heli karo nidaamka dugsiga.

Adeegyada U gudbinta Shaqada Hore ee la heli karo waxaa ka mid ah:
• Sahminta fursadaha shaqooyinka kala duwan.
• Khibradaha waxbarasho ee ku saleysan shaqada.
• Ka wada hadalka shahaadooyinka tababarka, iskuulada farsamada gacanta, ama kulliyadaha.
• Baridda xirfadaha kaa caawin kara inaad shaqo hesho, sida xirfadaha bulshada ee ah qofka iskii wax u qabsada.
• Taageerida horumarinta xirfadaha is-difaaca, oo ay ku jirto barashada sida aad naftaada iyo baahiyahaaga uga hadli lahayd.
	Adeegyada la heli karo:
	• Iskuduwaha Adeegyadaada wuxuu ka qayb gali karaa kulamada iskuulka si uu u barto xiisahaaga iyo yoolalkaaga.
	• Iskuduwaha Adeegyadaada ayaa la kulmi karaa adiga iyo qoyskaaga si uu xog dheeraad ah ku siiyo.
	• Iskuduwaha Adeegyadaada wuxuu kaa caawin karaa helitaanka iyo codsashada adeegyo kale.
	• Adeegyada DD, sida adeegyada hoyga ama nasashada, waxay ku xiran yihiin maalgelin la heli karo.
	• Adeegyada kharash ka dhaafida ee la heli karo iyadoo lagu saleynayo u-qalmitaanka iyo baahida:
	  ○ Kharash-ka dhaafida dadka Da'da ah iyo Naafada (AD)
	  ○ Kharash ka-dhaafida taageerada qoysaska (FSW)
	  ○ Kharash-ka Dhaafidda Cilladaha Horumarka Adeegga Maalinlaha ee Dadka Waaweyn loogu talagalay dadka 21 jirka ah iyo ka weyn
	  ○ Kharash-ka Dhaafidda Cilladaha Horumarka ee Dhameystiran (CDD)
	  ○ Kharash-ka Dhaafidda Dhaawaca Maskaxda ee Daran (TBI) ee loogu talagalay dadka da'doodu tahay 19 jir iyo ka weyn

Maxaa dhacaya kolka aan ka baxo dugsiga?

Dugsiga: Marka aad qalinjabiso ama aad noqoto 21 sano jir, macallinkaaga ayaa ku siinaya warbixin kooban oo qoran oo sharxaysa waxqabadkaaga (SOP). Tani waa soo koobid xirfadahaaga iyo kartidaada. Waxaa ka mid ah dejinnada, tignoolajiyada, iyo xeeladaha kaa caawiya inaad gaarto yoolalkaaga shaqo, kulliyad/tababar, iyo nolol.

NCBVI	DDD
Adeegyada U-gudbinta waxay bilaabmaan inta aad iskuulka joogto, waxayna kugu hagi doonaan inta lagu jiro isbeddelka laga gudbayo iskuulka ilaa shaqada.	Maalgelinta Adeegga Horumarinta Maalinlaha (Day Habilitation) ayaa la heli karaa marka aad ka qalinjabiso dugsiga sare, gaarto 21 jir, oo aad u qalanto Adeegyada Cilladaha Horumarka (DD).
Markaad ka baxdo iskuulka, waxaad sii wadan kartaa inaad la shaqeyso NCBVI si aad uga shaqeyso yoolalka shaqada, iyadoo ku xiran maalgelinta la heli karo.	Iskuduwaha Adeegyadaada: • Wuxuu la kulmaa adiga iyo kooxdaada si loo go'aamiyo nooca adeegyada maalmeed ee aad rabto • Kaa caawiyaa helitaanka adeegyada • Kormeeraa tayada adeegyada • Kula soo xiriiraa ugu yaraan bil kasta mar
NCBVI waxay kaa caawisaa diyaarinta shaqo helidda. Tani waxay ka mid noqon kartaa buuxinta foomamka codsiyada, samaynta warqada taarikh-nololeed CV-ga, iyo barashada sida loogu waraysto shaqo.	Adeegyada maalinlaha ah waxaa ka mid ah horumarinta xirfadaha shaqo mustaqbalka ah ee bulshada dhexdeeda, shaqo taageero leh, shaqo tabaruc ah, iyo ka faa'iidaysiga bulshaddaada.
Waa muhiim inaad xiriir joogto ah la sii waddo la-taliyahaaga NCBVI-VR. Waa inaad ilaalisaa ballamahaaga oo aad dhammaystirtaa hawlahaaga.	Dhammaan adeegyada waxay ka dhacaan bulshaddaada dhexdeeda. Adiga ayaa dooran kara adeegyada aad rabto inaad isticmaasho iyo sida aad u rabto.
	Adeeg kasta oo Naafonimada Horumarineed (DD) ah oo aad hore u haysatay wuu sii soconayaa. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah adeegyada nasashada ama adeegyada guryaha.

Sidee yoolalka loo go'aamiyaa?

Dugsiga: Yoolalkaaga sannadlaha ah ee dugsiga waxaa lagu saleeyaa heerarkaaga hadda ee guusha waxbarasho iyo waxqabadka shaqo (PLAAFP), iyo sida naafonimadaadu u saamayso barashadaada.

IEP-gaaga waxa kale oo ka mid ah yoolal loogu talagalay kadib marka aad ka qalinjabiso dugsiga sare. Yoolalkan ayaa ah: halka aad rabto inaad ka shaqeyso, halka aad wax ka baran doonto, iyo halka aad degganaan doonto Yoolalka ayaa ku sal leh danahaaga, sahminta shaqooyinka, hawlaha sahaminta xirfadda, xirfadahaaga, iyo awoodahaaga.

Waa muhiim inaad ka soo qayb gasho oo aad ka hadasho kulankaaga IEP. Adiga iyo kooxdaada IEP ayaad go’aansataan yoolalkaaga. Waa muhiim in adiga, iskuulkaaga, NCBVI, iyo DDD aad wadaagtaan macluumaadka ku saabsan yoolalkaaga.

NCBVI	DDD
Marka aad helayso Adeegyada U-gudbinta Shaqada Hore (Pre-ETS), foojignaanta ugu weyn ayaa la saaraa sahminta shaqooyinka iyo diyaarinta goobta shaqada.	Marka aad u dhaxayso 21 jir ilaa da’da hawlgabka, u kuurgalida ugu weyn ee adeegyada maalinlaha ee DD ayaa ah shaqo.
Adiga ayaa muhiim u ah qorshaynta yoolalkaaga. Waa inaad ka soo qaybgashaa kulamadaada. Ka-qaybgalkaaga kulamada iyo hawlaha ayaa kaa caawinaya inaad gaarto yoolkaaga. Waxaad sidoo kale horumarin doontaa xirfadaha is-go’aan qaadashada iyo is-difaaca.	Yoolalkaaga waxaa lagu saleeyaa waxa adiga muhiim kuu ah. • Waxa ugu weyn ee la eegayo waa rajadaada iyo riyooyinka aad leedahay. • Adiga iyo kooxdaada waxaad la kulantaan Isu-duwaha Adeegga si loo sameeyo yoolal. • Marka xirfadahaaga la qiimeeyo, waxaa la ogaanayaa waxa aad u baahan tahay si aad u gaarto yoolalkaaga.

Sidee ayaan u qorsheeyaa adeegyadayda?

Dugsi: Adiga iyo kooxdaada IEP (macallimiinta, maamulaha, waalidiinta, iyo kuwa kale) ayaad go'aansataan adeegyada waxbarashada gaarka ah, dejinnada, tignoolajiyada kaalmada, iyo hawlaha kaa caawin doona inaad gaarto yoolalkaaga. Inta lagu jiro sanadka, waxaad u shaqaysaa si aad u gaarto yoolalkaaga, waxaadna dhamaystirtaa hawlaha ku jira IEP-gaaga.

Sannad kasta, adiga iyo kooxdaada IEP waxaad u kulantaan si aad uga wada hadashaan horumarka aad ku gaadhay yoolalkaaga, xirfadahaaga, awoodahaaga, iyo waxyaabaha ku fududeeya barashada. Sannad kasta, IEP cusub ayaa la qoraa. Waxbarashada iyo taageerada gaarka ah ee aad hesho waxay ku xiran yihiin qorshahaaga IEP.

NCBVI	DDD
Adiga iyo kooxdaadu waxaad diyaarisaan Qorshe Shaqo oo Shakhsiyeed (IPE). Hannaanka ayaa kaa caawinaya inaad go'aansato yoolalkaaga shaqo. Qorshahaaga qoraalka ah wuxuu qeexayaa adeegyada gaarka ah ee loo baahan yahay si aad u gaarto yoolalkaaga iyo cidda adeegyadaas bixin doonta.	Adiga iyo kooxdaada waxaad samaysaan qorshe qofka ku wajahan. Qorshahaaga qoran wuxuu qeexayaa adeegyada aad heli doonto iyo cidda bixin doonta.
La-taliyayaasha NCBVI-VR waxay kaala shaqeeyaan si loo aqoonsado waxa kugu adag ee ka hor istaagaya inaad shaqo hesho. Waxay kaa caawiyaan samaynta yool shaqo oo sax ah iyadoo lagu salaynayo xirfadahaaga, danahaaga, iyo awoodahaaga.	Kooxdaada ayaa kobcinaya qorshahaaga. Kooxdan waxaa ka mid ah adiga, qoyskaaga, mas'uulkaaga sharci (haddii aad leedahay), bixiyeyaasha adeegyada DD, iyo dadka kale ee aad casuunto. Iskuduwaha Adeegyadaada wuxuu qoraal ahaan u diiwaangeliyaa qorshahaaga.
Shaqaalaha NCBVI waxay u shaqeeyaan si kooxeed, sidaas darteed kooxdaadu waxay ka koobnaan kartaa dhowr qof oo kugu taageeraya inaad gaarto yoolkaaga shaqo.	Iskuduwaha Adeegyada ee laguu qoondeeyey ayaa hoggaamin doona kooxdaada oona kuu doodi doonaa adiga.

Tusaale

Macmiisha helaya adeegyada NCBVI, la-taliyayaasha NCBVI waxay ka caawin karaan codsashada agabyo dheeraad ah, waxayna bixin karaan la-talin faa'iidooyin ku saabsan ardayda ku jira adeegyada kala-guurka.

Waa maxay waxa kale ee ay tahay inaan codsado?

Lambarka Bulshada

Waa inaad codsataa Ceymiska Bulshada. Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto Ceymiska Bulshada, Dakhliga Dheeraadka ah ee Ceymiska Bulshada, iyo/ama Caymiska Naafonimada ee Ceymiska Bulshada. Si aad wax badan u ogaato, booqo xafiiska Lambarka Bulshada ama www.ssa.gov/disabilityssi..

Goorta SSA go'aamiso in aad qabto naafo, Nebraska Medicaid ayaa isticmaalaysa isla go'aankaas.

Medicaid

DDD waxay kugu waajibisaa inaad codsato faa'iidooyinka Medicaid oo aad aqbasho haddii aad u qalanto. Medicaid waxay bixisaa maalgelin federaal ah oo la jaanqaadaysa maalgelinta gobolka, si DDD ay ugu maalgeliso adeegyo dad badan. Waa inaad codsataa Medicaid marka aad gaarto 18 sano jir. Waxaad online ka dalban kartaa iServe: https://iserve.nebraska.gov/

Kaalmada Dhaqaale

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto kaalmo dhaqaale oo ka timaadda barnaamijyada DHHS – Adeegyada Carruurta & Qoyska (CFS), sida:

- Kaalmada Waayeelka, Indhoolayaasha, ama Naafada (AABD)
- Dheeraadka Ceymiska Bulshada
- Barnaamijka Dheeraadka Nafaqada Cuntada (SNAP)
- Kaalmada Tamarta
- Waxaad online ka dalban kartaa iServe: https://iserve.nebraska.gov/

Kheyraad Kale

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto:

- Kaalmo guryo oo maxalli ah
- Bangiyada cuntada ama shabakadaha cuntada
- Qorshaha Keydinta Enable https://www.enablesavings.com/
- Easter Seals Qorshaynta iyo Kaalmada Dhiirrigelinta Shaqada (WIPA).https://www.easterseals.com/ne/our-programs/employment-training/wipa.html
- Xarunta Tababarka iyo Macluumaadka Waalidiinta (PTI Nebraska). https://www.pti-nebraska.org/

Macluumaadka waxaa laga heli karaa Nebraska 2-1-1, ee United Way of the Midlands. Si aad u hesho caawimada aad u baahan tahay, wac "211" adigoo adeegsanaya telefoon kasta ama ka gal onlayn bogga www.unitedwaymidlands.org/call211.

Tusaale

Codso dhammaan adeegyada aad u qalmi karto.